

Sida loo helo gaadiid lagu aado ballamahaaga tallaalka COVID-19

Guudmar

Haddii aad leedahay Apple Health (Medicaid) oo aad u baahan tahay caawimaad xagga aaditaanka ballamaha daryeelkaaga ah, Health Care Authority (HCA, Maamulka Daryeelka Caafimaadka) ayaa dabooli doona kharashka gaadiidkaaga. Waxaad adeegaan ugu isticmaali kartaa ballamaha xaaladaha caafimaadka ee aan degdegga ahayn sida tallaallada COVID-19.

Sida caawimaad looga helo gaadiidka

Wac dalaalka gaadiidka ee degmadaada (bogga 2 aad ka eeg liiska macluumaadka laga xiriiro dalaalka). Dalaalka wuxuu hubin doonaa u-qalmitaankaaga wuxuuna kuu diyaarin doonaa gaadiid buuxinaya baahiyahaaga dhaqdhaqaaqeed/socdaaleed. Haddii aadan u qalmin adeegaan, dalaalku wuxuu kugu hagi doonaa/kuu tilmaami doonaa kheyraadyada kale ee laga helo deegaanka.

Fadlan diyaarso macluumaadka soo socda markaad wacayso:

- Kaarkaaga adeegyada ProviderOne
- Cinwaankaaga dhamaystiran ee ah meesha lagaa soo qaadayo
- Goobta aad ballanta tallaalka ku leedahay
- Magaca iyo lambarka taleefanka adeeg bixiyahaaga caafimaad (uma baahnid inaad bixiso macluumaadkaan haddii aad u baahan tahay gaadiid si aad ugu aado goobta tallaalka COVID-19 ee dad oo dhan lagu tallaalo)
- Taariikhda iyo waqtiga saxda ah ee ballantaada
- Nooca ballanta daryeelka caafimaadka (tusaale, sifaynta, OB, ilkaha, tallaalka COVID-19, iwm.)

Su'aalaha inta badan la isweydiyo

Waa maxay gaadiidka xaaladaha caafimaad ee aan degdegga ahayn?

Kani waa adeeg kaa caawinaya inaad aado ama ka soo laabato ballamahaaga daryeelka caafimaadka. Noocyada ugu caansan ee caawimaadda gaadiidka waxaa ka mid ah baska dadweynaha, taksi, gawaadhida curyaamiinta, foorjarrada gaaska gaadiidka, iyo lacag-celinta masaafada safarka ee gaariga qofka gaarka u leeyahay. Adeeggaani kuma jiraan sariirta bukaanka lagu qaado, ambalaas, ama gaadiid amnigiisa la sugo.

Gaadiidka xaaladaha caafimaad oo aan degdegga ahayn ma u isticmaali karaa ballamaha tallaalka COVID-19?

Haa, waxaan daboolnaa kharashaadka gaadiidka lagugu geynayo lagaagana soo celinayo goob kasta oo tallaalka ah oo ay ka mid yihiin farmashiyeyaasha, rugaha tallaalka ee dadka badan isticmaalaan, iyo rugaha caafimaad ee baabuurta lagu dhex maro. Fadlan wac dalaalka gaadiidka ee degmadaada. Waxay kuu diyaarin doonaan safar daboolaya baahiyahaaga safareed/socdaaleed.

Yaa isticmaali kara gaadiidka xaaladaha caafimaadka ee aan degdegga ahayn?

Macaamiisha Apple Health (Medicaid) ee u baahan caawimaad xagga gaadiidka ah ayaa u qalma adeeggan.

Yaan wacaa si aan u helo gaadiidka loo isticmaalo xaaladaha aan degdegga ahayn?

La xiriir dalaalka gaadiidka ee ka shaqeeya degmadaada. Waxay eegi doonaan u-qalmitaankaaga waxayna isku dubbaridi doonaan safaradaada. Haddii aadan u qalmin adeegan, waxay kugu xiriirin doonaan/kuu tilmaami doonaan kheyraadyada kale ee laga helo deegaanka.

Goorma ayaan wacaa si aan u codsado gaadiidka?

Waa inaad wacdaa sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo, ugu yaraan laba maalmood oo shaqo kahor xilliga ballantaada caafimaad. Safarada degdega ah ee la soo sheegto wax kayar laba maalmood oo shaqo ayaa suurtagal noqon kara haddii gaadiidka la heli karo.

Macluumaadka lagala xiriiro dalaalka

Magaca dalaalka	Degmooyinka uu ka shaqeeyo/u adeego	Lambarka taleefanka
Hopelink	King, Snohomish	1-800-923-7433
Northwest Regional Council	Island, San Juan, Skagit, Whatcom	1-800-860-6812
Paratransit Services	Clallam, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Thurston	1-800-846-5438
Human Services Council	Clark, Cowlitz, Klickitat, Skamania, Wahkiakum	1-800-752-9422 (xulashada 2)
People for People	Benton, Chelan, Columbia, Douglas, Franklin, Kittitas, Okanogan, Walla Walla, Yakima	1-800-233-1624
Special Mobility Services	Adams, Asotin, Ferry, Garfield, Grant, Lincoln, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Whitman	1-800-892-4817

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg webseedka Non-Emergency Medical Transportation (NEMT, Gaadiidka Arrimaha Caafimaadka Degdeg ahayn) ee ah hca.wa.gov/transportation-help.



820-NonDOH May 2021 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov.



